KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad Muqdisho, Tr. 1 Abril 1974 L. 4

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 9 Tr. 14 Marso 1974 — *Wakaalad la siiyey Madaxweynaha G.S.K. inay baadhaan dacwadaha Maxkamadaha.* Bog. 158

---

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 9 Dishmebre 1973, L. 26 — *Tabar tijaabis ah oo loo furay Garsoore Cusub.* » 158

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 1 Jennayo 1974, L. 27 — *Assassid Degmooyin.* » 160

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 21 Febrayo 1974, L. 28 — *Dallacaad Sarkaal Boliska ah.* » 162

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 21 Febrayo 1974, L. 29 — *Bedel Garsoore Jaalle D. Cali Moxamed Ibrahim M.G.K.* » 163

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 1 Jennaayo 1974, L. 30 — *Magacaabid idaaradda gudiga Kacaanka degmada Yeed qaybtiisa wakiilada besha.* » 164

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 1 Jennaayo 1974, L. 31 — *Magacaabid idaaradda gudiga Kacaanka degmada Waajid qaybtiisa wakiilada besha.* » 165

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 1 Jennaayo 1974, L. 32 — *Magacaabid idaaradda gudiga Kacaanka degmada Jalalaqsi qaybtiisa wakiilada besha.* » 166

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Febrayo 1974, L. 33 — *Siismo dhul Dawladeed la siyey Jaalle Muraayad Xaji Xashi Jaamac.* » 167

# BOGGA SEDEEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaallet Afrax Cumar Maxamud. ((58)* Bog. 168

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Afrax Cumar Maxamud. (59)* » 168

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Ibrahim Afrax Cumar.,(60)* » 169

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cariif Qaasim Wehelie. (61)* » 169

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Axmed Roble Gabeyre. (62)* » 170

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xussen Maxamed Nuur. (63)* » 170

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaaji Cilmi Cawaale. (64)* » 171

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Sayid Axmed Shikh Muse. (65)* » 171

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cali Cabdulle Xussen. (66)* » 172

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Axmed Culuso. (67)* » 172

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaaji Moxmade Cabdulle. (68)* » 173

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamad Guuleed Cawaale. (70)* » 174

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Abshir Maxamuud Iidoon. (71)* » 174

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Ciise Ciilmi Ducaale. (72)* » 175

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maryan Cali Sharmarke. (73)* » 175

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Axada Cusman Maxamed. (74)* » 176

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaawa Caalin Cadaan. (75)* » 176

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Timiro Iidle Cabdi. (76)* » 177

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Muxubba Xassan Cali. (77)* » 177

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Ashkira Xassan Shirwav. (78)* » 178

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Faaduma Axmed Geelle. (79)* » 178

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhuid Buugga L. 8449 — *Faaduma Sheekh Aadan. (80* » 179

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhuid Bugga L. 8664 — *Faaduma Cabi Cumar. (81)* » 179

KOJU-SHIRKADDA (Co. Giu.) Kisimayo — *Ogeysiis Shir. (82)* » 180

SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI - SOPRAL S. p. A. — *Avviso di Convocazione Assemblea Ordinari e Straordinaria. (83)* » 181

TOOSIN SHARCIGA SHAQAALAHA «LABOUR CODE» — *Lambar 65 ee 18kii Oktoober 1972, Faafin Rasmi ah Lambar 4 ee 20kii Abril 1973.* » 181

**SHARCI L. 9 Tr. 14 Marso 1974.**
**Wakaaladd la siiyey Madaxweynaha G. S. K. inay baadhaan dacwadaha Maxkamadaha.**

GUDDOONSHAHA

GALAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO Tixgelinaaya cgoloaanshihii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA
Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Awoodda baadhista dacwooyinka*

Awoodda baadhista dacwooyinka Maxkamadaha ka soo dhammaada ee uu lahaa Golaha Sare ee Kacaanku sida uu dhigayo Sharciga Lam. 38 soona baxay 5tii Abril, 1972 waxaa loo wareejiyey Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gelid*

Sharcigani wuxuu dhaqan galay 5tii Abril, 1972.
Muqdisho, 14kii Marso 1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**9 Dishembre 1973, L. 26.**
**Tababar tijaabis ah oo loo furay Garsore Cusub.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;

ANNAGOO ARAGNAY Xeerkii soo baxay 21kii Oktoobar 1969 lambar 1;

ANNAGOO ARAGNAY Dekreeta Sharci 21kii Juun 1962kii, lambar 3 Nidaamka u degsan Garsooridda, iyo wixii kalo iska beddelay;

ANNAGO ARAGNAY Xeerkii ka soo baxay G.S.K. 25kii Octoobar 1969, lambar 12;

WAXAA AH Lagama maarmaan in Tababar Tijaabis ha loo furaa Garsorre cusub oo aan hoos magaciisa ku sheegi doono;

SOO JEEDINTA Waxaa lahaa Xoghayaha Dawladda Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

DEKREETO

Qodobka keligis

Waxaa lagu magacaabay Garsoore Tijaabis ah (Uditore Giudiziario), muddo lix (6) bilood ah, laga bilaabo 1da Nofembar 1973, magaca aan hoos ku soo sheegi donoo:

1) — Jaalle YUUSUF AADAN FAARAX

Waxa mashahaaradiisa dheeraad ka ah «Buro Hawl Xirfad iyo Guri» (indennità professionale ed alloggio) sida uu qabo Qodobka Afaraad Xeerkii soo baxay 15kii Agosto 1966 lambar 4.
Muqdisho, 9 December 1973.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Dr. Cabdisalam Sh. Xuseen*
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

*Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda Wasaaradda Lacagta

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 203.*
*Mogadiscio, li 10 Marzo 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**1 Jennaayo 1974, L. 27.**
**Asaasid Degmooyin.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Qodobka 3aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8di Juun 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO OGAADAY in ay tahay lagama maarmaan in la asaaso Degmooyin cusub si loo daryeelo horumarka, isla markaasna si diimuqraatinimo ah loo ballaariyo hoosna loogu dhaadhiciyo dadka awooda maamulka dalka;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayeyaasha Dawladda.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1da Jannaayo 1974, waxaa la asaasay Degmooyinka halkan hoose magacyadooda ku taxanyihiin oo ka tirsanaaandoona Gobollada mid walba horteeda ku qoran:

1. — *Degmada Tiyeeglow oo ka tirsanaan doonta Gobolka Bakool.*

— Soohdinta Degmada Tiyeeglow waxay ahaanaysa tii ay hore u lahayd municiipiyada Tiyeeglow Xeer Guddoomiyaha Jamhuuriyada lambarkiisu yahay 225 ee 30-11-1963 ee ku soo baxay faafinta rasmiga ah ee 5-10-1963 «Suppl. N. 3 al n. 10».

2. — *Degmada Saakoow oo ka tirsanaan doonta Gobolaka Gedo.*

— Soohdinta Degmada Saakoow waxay ahaanaysa tii ay ka koobnaayeen Municijiyaalka Saakow iyo Dujuma ee ku tifaftiran Xeerka lambarka koowaad ee isla warqaddan ku qoran.

3. — *Degmada Taleex oo ka tirsanaan doonta Gobolka Nugaal.*

— Soohdinta Taleex waxay ka bilaabmeysa dhinca bari xuduudkii hore Qardho - Laascaanood meesha la yiraahdo Welo oo u soconeysa Galbeed oo raacayo jiitin toosan. Xuduudkii hore ee Laas-Caanood-Erigaabo ilaa iyo 120 Km. dábadeedna u soo noqonayo dhinaca Koofur oo saani ugu soo dhacaya waddada Garowe-Xudun Dheererka jiitinta waxay noqonaysaa 60 Km. Haddana waxaanu u soo noqonayaa Koonfur-Bari ilaa uu ku soo dhacayo xuduudka Lass-Caanod-Garowe, isagoo kaga soo dhacaya meel

u jirta 20 Km. tuulada Garaama xagga waqooye. Taleex iyo Garoowena waxaa soohdin u noqonaya xuduudkii hore ee Garowe-Laas-Caanod. Taleex iyo Qardho waxaa soohdin u noqonaya xuduudkii hore ee Laas-Caanood-Qardho,

Tuulooyinka hoos imaanaya Degmada Taleex:

1) — Xalin

2) — Carrooley

3) — Gudaalo

Qodobka 2aad

Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay hubindoontaa sameynta iyo naadada nashaqadda muujinaysa qaabka dhulka Degmooyinka lagu aasaasay Xeerkan.

Qodobka 3aad

Waxaa la baabi'iyey qaanuunkasta ee qilaafsan ama ka soo horjeeda amarada lagu bixiyey Xeerkan.

Qodobka 4aad
*Dhaqan gal*

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1-1-1974.

Waxaa saxiixay:
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Waxaa saxiixay:
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*

*VISTO e registrato - Reg n. 1, foglio n. 33.*
*Mogadiscio, li 27 Febbrao 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**21 Febrayo 1974, L. 28.**
**Dallacaad Sarkaal Boliska ah.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aad) ee Sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska lana soo saaray 23kii disambar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO KU AMRAY Warqaddii taariikhdeedu ahayd 13-2-1974 kuna lambarsanayd XMG-GSK-13-4479 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka ugana soo xogwarramay Sarkaal ka mid ah Ciidanka Boliska asagoo soo jeediyay in la dallacsiiyo;

ASAGOO TIXGELIYEY Mashaariicdii ka hirgashay Degmada Jowhar;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1

In laba Xiddigle Boliska ah ee hoos ku magacaaban la dallacsiiyey, lana siiyey darajada Dhamme marka laga bilaabo Febraayo 13da 1974, kuna hirgaleysa xagga Sharciga iyo dhaqaalahaba:

1\. — Laba Xiddigle Xussen Rooble Siyaad.

Qodobka 2

Xeerkani degdeg buu i dhaqan gelay, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Febrayo 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Lacagta
*Takh. Maxamed Yuusuf Weyrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 185.*
*Mogadiscio, li 7 Marzo 1974.*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**21 Febrayo 1974, L. 29.**
**Beddel Garsoode Jaalle Dr. Cali Maxamed Ibraahiim — M.G.S.K.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Xeerkii soo baxay 21-10-1969, Lambar 1;
ISAGOO ARKAY Xeerka lamb. yahay 110-72 soo baxay 20kii Oktoobar 1972kii;

ISAQOO AQOONSAN Baahida Madaxtooyada G.S.K. ay u qabto Garsoore ka shaqeeya Laanteeda ugu qaybsan Sharciga;

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1

In Jaalle Garsoore Cali Maxamed Ibraahim, laga beddelo Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta, lana geeyo ku-meel-gaar-ahaan, Madaxtooyada G.S.K. — Laanta Sharciga.

Qodobka 2

Jaalle Garsoore Cali Maxamed Ibraahim, mushaaradiisa iyo wixii kaloo dheef ah sidii hore ayuu uga qaadan doonaa Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta ilaa iyo Amar dambe.

Muqdisho, 21-2-1974.

Saxiixay,
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA G.S.K.

Saxiixay,
*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen*
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

Saxiixay,
*Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawlad. Wasaaradda Maaliyada

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 152.a*
*Muqdisho, li 27 Febbraio 1974.*

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**1 Jennayo 1974, L. 30.**

**Magacaabid Idaaraddda Guddiga Kacaanka Degmada Yeed qaybtiisa Wakiillada Beesha.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddoomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 68 ee 23 Juunyo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sareku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool.

## WUXUU GOOYEY

### Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Yeed qeybta Wakiillada Beesha.

1. — Jaalle Maxamed Naasir Cabdi Maxamed;
2. — Jaalle Jaamac Mursal Diiriye;
3. — Jaalle Moxamed Cabdulwaaxid Ibraahim;
4. — Jaalle Guure Saalax Cali;
5. — Jaalle Maryan Jaamac Guuleed;
6. — Jaalle Faaduma Bulshaale Moxamed;
7. — Jaalle Xaliima Xasan Qaboobe;
8. — Jaalle Cabdulqaadir Moxamed Cabdulle;
9. — Jaalle Ibraahim Kaalmooy Adan.

### Qodobka 2aad

*Dhaqan galka*

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1-1-1974.

Waxaaa saxiixay:
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 34.*
*Mogadiscio, li 27 Febbraio 1974.*

[illegible]

[illegible]

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**1 Jennayo 1974, L. 31.**
**Magacaabid Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Waajid qaybtiisa Wakiil-lada Beesha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 juunyo 1972 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddoomiyaha G.S.K. ee labarkiisu yahay 49 ee 8 bisha Febbrayo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Waajid qeybta Wakiillada Beesha:

1. — Jaalle Cali Aadan Aamin;
2. — Jaalle Faarax Xuseen Cali;
3. — Jaalle Isaaq Ibraahim Ibraahim;
4. — Jaalle Maxamed Keer Cabdalle;
5. — Jaalle Beeniya Ismaaciil Moxamed;
6. — Jaalle Xaliima Maadeey Maxamed;
7. — Jaalle Xabiiba Shiikh Ismaaciil;
8. — Jaalle Cabdullahi Xuseen Warsame;
9. — Jaalle Maryan Xuseen Daahir.

Qodobka 2aad

*Dhaqan galka*

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1-1-1974.

Waxaa saxiixay:
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmie*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 35.*
*Mogadiscio, li 27 Febbraio 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
[illegible]

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
1 Jennayo 1974, L. 32.
**Magacaabid Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Jalalaqsi qaybtiisa Wakiillada Besha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga labarkiisu yahay 52 ee 8 juunyo 1972 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddoomiyaha G.S.K . ee lambarkiisu yahay 49 ee 8 bisha febbraayo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGO TIXGELINAYAH Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Hiiran.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Ka billaabanta taariikda Xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Jalalaqsi qeybta Wakiillada Beesha:

1. — Jaalle Sheekh Rashiid Xaaji Axmed;
2. — Jaalle Hooray Waasuge Faarax;
3. — Jaalle Maxamad Axmad Cabdiraxmaan;
4. — Jaalle Buntuq Moxamed Kulmie;
5. — Jaalle Cabdiraxmaan Aadan Nuur;
6. — Jaalle Kaliif Tigo Nuur;
7. — Jaalle Cabdi Nuur Cifaaf;
8. — Jaalle Xaawo Cumar;
9. — Jaalle Cabdiraxmaan Xasan.

Qodobka 2aad

*Dhaqan galka*

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1-1-1974.

Waxaa saxiixay:
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 36.*
*Mogadiscio, li 27 Febbraio 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD
6 Febrayo 1974, L. 33.
Siismo dhul Dawladeed la siyey Muraayad Xaji Xashi Jaamac.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOOAR AGNAY Xaashaddi 1Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 41 taarikhdeeduna aheyd 13-9-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeedunna aheyd Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Aadan Shirre Jaamac, taarikhdeeduna aheyd 24-7-1966, Muqdisho — Xafadda Valle Nord;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda L.6-4 taarikhdeeduna aheyd 30-4-1967;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolonsihii gudiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 2623 bishii 28 Jun. 1967, soona gudubtay fadhigii 12aad ee 19 Sett. 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 11819 bishii 9-12-1973, soona gudubtay fadhigii 1aad ee 11-12-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 93487 taarikhddeeduna aheyd 4-10-1967, in Jaalle Aadan Shire uu dhibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 900, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay BF-981-2566-67 taarikhdeeduna tahay 11 Oktoobar 1967, in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiyaa mq. 900, Xafadda Valle Nord;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameuso dhulka isaga ah;

ANNAGO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xafiiska sixadda L. 85 taarikh. tahay 10 Jen. 1974, oo caddeyneyso dhismaha guriga Muraayad Xaaji Xaashi (ex Aadan Shiro Jaamac) oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hobsinada dhulka ay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, oo waafaqsan dhismaha guriga taarikhdeeduna aheyd 5-2-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 4028 Rep. taarikhdeeduna aheyd 16 Jennayo 1973, oo lagu qoray buuga Canshuurta L. 253 ee Xa-

fiiska Canshurta L. 20, eena lagu dhigay Xafiiska Noteyaha Dr. Muse Xusen Sadiq, ee Jaalle Aadan Shire Jaamac uu ugu hibeeyey Jaalle Muraayad Xaji Xaashi Jaamac dhulkiisu ku yuul Muqdisho Valle Nord, dhulka la mid ah mq. 900;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi innu ka bahay ninka kor ku so sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muraayad Xaji Xaashi Jaamac la siiyay dhuldawlad eed e ku fadhiyaa mdh. 900, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Valle Nord.

Muqdisho, 6 Febrayo 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.
*G. Sare Moxamed Sheekh Cosman*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 6.*
*Mogadiscio, li 21 Febbraio 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUUR

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Afrax Cumar Maxamud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 4-7-68, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 20x40 = 800 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul Dawladeed; Koofur Dhul uu leeyahay asagu; Galbeed Jidka Balcad; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Kusime Inj. C. C. Guuleed*

*(58)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Afrax Cumar Maxamud, u usoo qortay arji arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17-9-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas rektangolaar ah, kuna fadhiya 20x40 = 800 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul uu leeyahay jaallaha kor ku qoran. Koofur Dhul uu leeyahay Jaalle Ibraahim Afrax; Galbeed Jidka Calcad; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Kusime Inj. C. C. Guuleed*

*(59)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Afrax Cumar, u usoo qortay Dhismaha iyo, Dhulka 9-1-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas rektaangoolar, kuna fadhiya 20x40 = 800 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul uu leeyahay Jaallle Afrax Cumar; Koofur Dhul dawladeed; Galbeed; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Kusime Jnj. C. C. Guuleed*

*(60)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cariif Qaasim Weheliye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 9-1-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Valle Nord -

Hodan, oo leh qiyaas rektaangollar ah, kuna fadhiya 60x27 = 1620 mdh.

Soohdin: Waqooy Jid.; Koofur Jid.; Galbed Jid.; Bari Dhul ay leedahay Jaalle Xaliima Warsame.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(61)* *Kusime Jnj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Rooble Gabeyre, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 26-1-1967, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas Afargees ah, kuna fadhiya 12x12 = 144 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid.; Koofur Cumar Calasow; Galbeed Jid.; Bari Xasan Cali Weheliye.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(62)* *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xusen Maxamed Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18-10-73, uu ku weydiisanayey dhul dismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas Rektaangollar, kuna fadhiya 46x8 = 368 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga dhul ay leedahay wakaalada Biyaha.
Koofur Waxaa ka xiga dhul la siiyay jaallaha kor ku qoran.
Galbeed Waxaa ka xiga dhul Jidka Balcad.
Bari Waxaa ka xiga dhul Haanta Biyaha.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud. dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(63) *Kusime Jnj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Cilmi Cawaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 5-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas Tarabeesiyo 29x21x13,50, kuna fadhiya 446,25 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jid.
Koofur Waxaa ka xiga Dhul dawladeed.
Galbeed Waxaa ka xiga Jidka Shariif Calawi.
Bari Waxaa ka xiga Sheekh Sooble Awees.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(64) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sayid Axmed Shikh Muuse, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 4-6-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho 21 Oktoobar, oo leh qiyaas

trabeesiyo, kuna fadhiya 2.040 = mdh.
Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jid.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Dhul 1.3 yo 8.
Bari Waxaa ka xiga Jidka 26 Juuniyo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(65) *Kusime Inj. C. C Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Cabdulle Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 9-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 30x20 = 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jidka Ummadda.
Koofur Waxaa ka xiga Jidka Cali Xasan Jumcaale.
Galbeed Waxaa ka xiga Jidka.
Bari Waxaa ka xiga Mafta Auw Xasan.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(66) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Cuslusow, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 4-12-73, uu ku weydiisanayey dhul dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas

afargees, kuna fadhiya 729 = mdh.
Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Waddo.
Koofur Waxaa ka xiga Waddo.
Galbeed Waxaa ka xiga Waddo.
Bari Waxaa ka xiga Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(67) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Cabdulle, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 21-2-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas Rektaangolaar, kuna fadhiya 183,75 = mdh.
Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Cumar Afeey.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Jid.
Bari Waxaa ka xiga Jaalle Maxamed Cusmaan.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(68) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shekh Xasan Xuseen Naaleeye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 4-11-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley

(Buur-Hindi), oo leh qiyaas Tarabeesio, kuna fadhiya 850 = mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka Xiga Jid.

Koofur Waxaa ka Xiga Masaajidka Jaamacatul Raxma.

Galbeed Waxaa ka Xiga Degmada Ciise Cilmi Ducaale.

Bari Waxaa ka Xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(69)* *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Guuled Cawaale, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 12-12-59, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 20ee30 = 2600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga bannaan.

Koofur Waxaa ka xiga dhul bannaan.

Galbeed Waxaa ka xiga Guriga lamb. yahay 617-61.

Bari Waxaa ka xiga Jidka Balcad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 24 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(70)* *Maaxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Abshir Maxamuud Iidoow, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 16-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Holl Wadaag, oo leh qiyaas Afar Gees Sinan, kuna fadhiya 182,25 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Jid.

Koofur Waxaa ka xiga Jaalle Sidoowxaaji Cali.
Galbeed Waxaa ka xiga Jaalle Cabdulle Wardheere.
Bari Waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 24 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(71)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ciise Cilmi Ducaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 16-11-65, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas Rektangolaar, kuna fadhiya RE = 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Dhul weydistay Jaalle Xasan Shirwac.
Koofur Waxaa ka xiga Dhul dawladeed.
Galbeed Waxaa ka xiga Dhul dawladeed.
Bari Waxaa ka xiga Dhul Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 24 Marso, 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Mohamed Cabdi Saciid*

*(72)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Cali Sharmarke, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 5-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas Trabeesiyo, kuna fadhiya 784,53 mdh.

Soohdhin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jid:
Koofur Waxaa ka xiga Jid. 30 mt ah.

Galbeed Waxaa ka xiga Jid. 26 Juuniyo.
Bari Waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu sı fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(73)* *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddynaeyaa in Jaalle Axada Cusmaan Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 19-2-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas afargeesle guman, kuna fadhiya 576 mdh.

Soohdin:
Waqooy Waxaa ka xiga Jid.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Jid.
Bari Waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(74)* *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaawa Caalima Caddaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha yo Dhulka 7-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiaas rektaangolaar ah, kuna fadhiya 640 mdh.
Soodhin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Jidka Ummada.
Koofur Waxaa ka xiga Cuure Maxamed Rooble.
Galbeed Waxaa ka xiga Jid.
Bari Waxaa ka xiga Timiro Iidle Cabdi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(75) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Timiro Iidle Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 7-3-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektaangolaar ah, kuna fadhiya 640 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jidka Ummadda.
Koofur Waxaa ka xiga Jilacey Afrax.
Galbeed Waxaa ka xiga Xaawo Caalin.
Bari Waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 14 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(76) *Kusime Inj. C. C. Guuleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muxubba Xasan Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 2-7-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas, kuna fadhiya 400 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Dhul lamb. 37.
Koofur Jid.

Galbeed Dhul lamb. 42.
Bari Dhul lamb. 44.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 24 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(77)* *Moxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ahhkira Xasan Shirwac, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 16-11-65, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Ka Araan, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 600 mdh.
Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga dhul Dawladeed.
Koofur Waxaa ka xiga dhul uu weydistay ciise Ciilmi Ducaale.
Galbeed Waxaa ka xiga dhul dawladeed.
Bari Waxaa ka xiga dhul Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 24 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(78)* *Moxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faduma Axmed Geelle, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 9-3-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektaangolar, kuna fadhiya 12x15 = 180 mdh.
Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga dhul dad leeyahay.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga dhul uu leeyahay Yuusuf Xaaji.
Bari Waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 30 Marso 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(79)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

---

Waxaan arkay warqadda ay soo qortay Faaduma Sheekh Aadan oo wakiil u ah wiilkeeda la yiraahdo Cabdullaahi Sheekh Maxamad Yuusuf, waana wax ku saabsan hawsha xafiiskan.

Haddaba markaan arkay qodobka 69 D. L. del 1965, n. 2;

Waxaa cad dhumista buugga lamb. 8449 oy ku taal lacag ah Sh. So. 4.919,90 (afarkunsagaalboqoltobaniyosagaal iyo 9%), oo u tiil Bankiga Keydda iyo Amaahda (ex Bur Saciid).

WAXAAN AMARAYAA

In loocsusbooneysiiyo mar labaad jeegga muddo ah 30 (soddon) beri oo laga billaabo markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale; haddaan la helin qof kale oo sheegta buuggaas, waxaa kaloo la

CADDEYNAYAA

In jeegga gacanta laga saari doono ninka la yiraahdo Cabdullaahi Sheekh Maxamad Yuusuf ama qof ka sita wakaalad iyadoo la sugayo 15 kaas beri.

Xamar, 23-3-1974.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Xrmar

*(80)* *W. S. Jaalle Xuseen Sheewh Cabdiraxmaan*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

---

Waxaan arkay dacwadatan soo qortay Faduma Cabdi Cumar oo wax ka saabsan shaqada xafiiskaan, hadaba markaan arkay qodobka 69 D. L. del 1965, N. 2;

Waxaa cad dhumista buuggaas L. 8664 oy ku taal lacag dhan Sh. So. 381,50 (saddexboqolsideetaniyokow iyo konton santi) shilin oo tiil bangiga kaydinta iyo Amaahda waxaan amrayaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad buuggaas muddo ah 30 (soddon) beri oo laga bilaabo markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale, haddaan la helin qof kale oo sheegta

buugaas, waxaa kaloo la caddeynayaa in buuggaas gacanta laga saaro gabadha la yiraahdo Faaduma Cabdi Cumar ama qof ka sita wakaalad iyadoo la sugaayo 30 (soddon) kaas beri.

Muqdisho, 26-3-1974.

Gudoomiyaha Max. Gobolka Xamar

(81) *W. S. Dr. Yaasiin Shire Faarax*

---

KOJU — SHIRKADDA (CO.GIU.) — KISMAAYO

---

OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa lagana codsanayaa dadka sabmiga ku leh shirkaddaas, inay ka soo qayb galaan fadhi caadiya iyo mid aan caadi ahayn taariikh 29 Abrile 1974, $1^1/_2$ fiidnimo (ore 7.30 p. m.) rugta shirkadda Kismayo. Haddii uu fadhigaas ansixi waayo xagga tirada timid, wuxuu fadhigii labaad ahaan doonaa maalinta 11ka Majo 1974 isla rugtii iyo saacaddii hore. Arrimaha maalintaas.

DHANKA CAADIGA AH

1. — Faallada Guddiga Maamulka kuna saabsan misaaniyaddii 1973dii, ka Xogwarranka Guddiga Baarista iyo ansixinta Misaaniyadda;

2. — Doorashada Guddiyada Maamulka iyo Baarista.

DHANKA AAN CAODIGA AHAYN

1. — Dhimidda Maaliyadda shirkadda qiyaas 30%, taasoo ay sababtu tahay sahmiyaal (azionisti) shrikadda deyn ka qabay ama wax celin oo la doonayo in sahmigoodii laga dhimaa maaliyadda Shirkadda; iyo Wixii kele ee raaca.

Fadhigaas waxaa ka qayb geli kara qofkii buugga shirkadda ku qoran shan maalmood fadhigaas ka hor. Sahmigiisii ama Guddoon Bankina keenay rugta shirkadda.
Xamar, 1-4-1974.

GUDDOOMIYE XIGEENKA KOJU

(82) *Jaalle Soleymaan Yuusuf*

SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI — SOPRAL — S.p.A.
Sede in Mogadiscio — Capitale Sociale Shs. So. 1.000.000,00

## AVVISO DI CONVOCAZIONE
## DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA E ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Prodotti Alimentari - SOPRAL - S.p.A., con sede in Mogadiscio, sono convocati in Assemblea Straordinaria e Ordinaria, presso la Sede Sociale, per il giorno 29 Aprile 1974 alle ore 10 in prima convocazione, e occorrendo in seconda convocazione per il giorno 20 Maggio 1974 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

*PARTE STRAORDINARIA:*

1. — Modifica degli Art. 10, 15, 18 e 20 dello Statuto Sociale.

*PARTE ORDINARIA:*

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Presentazione Bilancio e Conto Perdite e Profitti al 31 Dicembre 1973 e deliberazioni relative;
3. — Nomina del Consiglio di Amministrazione previa determinazione del numero dei suoi membri;
4. — Conferimento poteri.

Hanno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale o presso un Istituto Bancario in Mogadiscio.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

*(83)*

---

## TOOSIN SHARCIGA SHAQAALAHA «LABOUR CODE»

*Lambar 65 ee 18kii Oktoober 1972, Faafin Rasmi ah, Lambar 4 ee 20kii Abril 1973.*

Qodobka 2aad toosinta Sharciga shaqaalaha faafin rasmi ah lambar 4 ee 20kii Abril 1973, xubintiisa 2aad (Sub-Para 2) waxaa loo akhriyayaa sida soo socota:

«Shaqaalaha Dawladda waxaa Sharcigani ulajeedaa kuwa dharka cad (Civil Servants) ama Ciidammada Qalabka Sida iyadoo ay ku *jiraan* shaqaalaha Wakaaladaha madaxa banaan iyo kuwa Mashruucyada Dawladda wax ku leedahay ka shaqeeya».

GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA